

# Mooshin ku saabsan waxkabadalka dastuurka ee magacaabista

Maarso 30, 2026

Dowladda Alberta ayaa soo bandhigi doonta mooshin ku baaqaya in wax laga beddelo dastuurka kaas oo gobolka siinaya fursad ah in uu talo ku yeesho magacaabista maxkamadaha sare.

Sida ku cad Qaybta 96aad ee *Xeerka Dastuurka, 1867*, dowladda federaalku waxay garsoorayaal u magacawdaa maxkamadaha sare ee gobollada, inkastoo gobollada ay mas'uul ka yihiin maamulka maxkamadahaas. Mooshinka Alberta wuxuu ku baaqayaa in qaab-dhismeedkaas wax laga beddelo si gobolku uu door rasmi ah uga qaato xulashada garsoorayaasha u adeega dadka reer Alberta.

Mooshinkan, haddii ay ansixiyaan sharci-dejiyeyaashu, wuxuu ku baaqi doonaa in wax laga beddelo Dastuurka Canada. Isbeddel kasta wuxuu u baahan doonaa ansixinta Baarlamaanka. Alberta waxay ugu baaqaysaa dhammaan xisbiyada Baarlamaanka inay taageeraan soo bandhigidda iyo ansixinta wax-ka-beddelka dastuurka ee loo baahan yahay.

Habka la soo jeediyay, magacaabista maxkamadaha sare ee Alberta waxaa laga sameyn doonaa musharixiinta ay Alberta ku talisay oo ay ansixisay, taasoo gobolka siinaysa door toos ah oo ku aaddan habka xulashada. Habkani wuxuu ilaalinayaa madaxbannaanida garsoorka wuxuuna xoojiyaa doorka Alberta ee maamulka caddaaladda iyadoo la hubinayo cod cad oo gobol in lagu yeesho magacaabista garsoorka.

"Alberta waxay mas'uul ka tahay sida caddaaladda looga hirgeliyo gobolkan laakiin door toos ah kuma lahan magacaabista garsoorayaasha maxkamadda sare. Maxkamadahaasi waxay u adeegaan dadka reer Alberta maalin kasta, gobolka maamula nidaamkaasna waa inuu door ku leeyahay cidda loo magacaabay. Mooshinkan wuxuu wax ka qabanayaa farqigaas, wuxuu xoojinayaa kalsoonida dadweynaha wuxuuna hubinayaa in Alberta ay door cad ka ciyaarto sida caddaaladda looga hirgeliyo gobolkan."

*Danielle Smith, Guddoomiyaha Gobolka*

Canada waa mid ka baxsan nidaamyada federaalka, halkaas oo dalalka la midka ah ay siiyaan gobolada ama dowlad goboleedyada door toos ah oo ku aaddan magacaabista garsoorka. Waqtigan xaadirka ah magacaabista garsoorka waxaa lagu sameeyaa guddiyada la-talinta garsoorka, kuwaas oo qiimeeya oo baara codsadayaasha isla markaana siiya talooyin aan qasab ahayn dowladda

federaalka. Habka hadda jira ma siinayo dowlad goboleedyada inay saameyn macno leh ku yeeshaan magacaabista garsoorayaasha.

"Gobolladu waxay u baahan yihiin cod toos ah inay ku yeeshaan go'aaminta cidda ugu habboon inay hogaamiso maxkamadahooda. Habkani wuxuu keeni doonaa dheelitirnaan weyn oo ku saabsan sida loo sameeyo magacaabista garsoorka wuxuuna taageeri doonaa geeddi-socod hufnaantiisa iyo isla xisaabtankiisu ay ka wanaagsan yihiin sidii hore iyadoo la xoojinayo madaxbannaanida garsoorka."

*Mickey Amery, Wasiirka Cadaaladda ahna Qareenka Guud*

Guddoomiyaha Gobolka Alberta Danielle Smith, oo ay weheliyaan Guddoomiyaha Gobolka Ontario Doug Ford, Guddoomiyaha Gobolka Quebec François Legault iyo Guddoomiyaha Gobolka Saskatchewan Scott Moe ayaa warqad wadajir ah u qoray Ra'iisul Wasaare Mark Carney iyagoo ku baaqaya in la sameeyo hab macno leh oo wada shaqeyn ah si loo doorto garsoorayaasha maxkamadaha sare, maxkamadaha racfaanka iyo Maxkamadda Sare ee Canada.

Hindisahan wuxuu ku salaysan yahay jawaab celin ka timid Alberta Next Panel, halkaas oo dadka reer Alberta ay ku baaqeen in door gobol oo sidii hore ka xooggan lagu yeesho magacaabista garsoorka si loo hubiyo in maxkamaduhu ay ka turjumaan baahiyaha kala duwan ee bulshooyinka Alberta.

### **Xaqiiqooyin kooban**

- Guddoomiyaha Guud wuxuu awood u leeyahay inuu garsoorayaal u magacaabo maxkamadaha sare ee Alberta, sida ku cad Qaybta 96aad ee *Xeerka Dastuurka, 1867*.
- Haddii la ansixiyo, mooshinka wuxuu codsan doonaa wax ka beddel dastuuri ah. Wax ka beddelka noocaas ah wuxuu u baahan doonaa ansixinta Golaha Sharci-dejinta ee Alberta iyo Baarlamaanka ka hor inta aan lagu dhawaaqin sharci ahaan.
- Waqtigan xaadirka ah magacaabista garsoorka sare maxkamadaha sare waxaa lagu sameeyaa guddiyada la-talinta garsoorka, kuwaas oo qiimeeya oo baara codsabayaasha isla markaana siiya talooyin aan qasab ahayn dowladda federaalka.

### **Macluumaadka la xiriira**

- [Talooyinka Alberta Next Panel](#)

### **Wararka la xiriira**

- [Gobolladu waxay u midoobeen inay dib u habeeyaan](#) magacaabista garsoorka (Maarso 24, 2026)
- Magacaabista [garsoorka federaalka ee Alberta: Guddoomiye Gobol Smith iyo Wasiir Amery](#) (Febraayo 3, 2026)

### Warbaahinta kala duwan

- [Daawo war saxaafadeedka](#)